



Qareennadda u dooda xiriir caafimaad leh oo diyaar u ah ardayda

Liane O'Banion, Agaasimaha Title IX ee Dugsiyada Dadweynaha ee Portland, waxay la shaqeysay laba kooxo ugu weyn ee udooda dadka Portland si loo sameeyo fariintan ee ku saabsan adeegyada iyo taageerooyinka ay heli karaan ardayda:

Dadaal lagu horumarinayo ogolaanshaha dhaqanka, kobcinta cilaqaad caafimaad leh iyo ufdiinta taageerada dhammaystiran shaqsiyaadka waxyeello ka gaartay rabshadaha wadanoolaanshaha, Dugsiyada Dadweynaha ee Portland Public School waxay la kaashanaysaa Raphael House of Portland iyo Volunteers of America Home Free si ay ardayda, shaqaale iyo bulshada u helaan adeegyada u doodista.

Raphael House iyo VOA Home Free waa ururada samafalka maxalliga ah ee xiriir caafimaad leh ka shaqaynayay fasal iyo goobaha bulshada Portland tan ilaa 2006.

Qareennadda u dooda xiriir caafimaad leh waxay bixiyaan adeegyadan u doodista iyo taageero:

Waxbarashada bulshada iyo taageerada

- Bandhigyada fasalka ee ku saabsan cilaqaadyada caafimaadka leh iyo ka hortagga rabshadaha
- Tababarka loo habeeyay shaqaalaha iyo waalidiinta (tusaale ahaan, fahamka, aqoonsashada iyo ka jawaab celinta rabshadaha shukaansiga dhallinyarada, taageerada ardayda dhaawac soo gaaray; qalabka iyo kheyraadka shaqaalaha dugsiga)
- Wadatashi iyo taageerada
- Latalinta ardayda iyo naadiyada doonaya inay ka hortagaan rabshadaha shukaansi
- Kobcinta ogolaanshaha dhaqanka

Adeegyada u doodista shaqsiyeed ee dhallinyarada

- Taageerada shucuurta naxariiseed iyadoo diirada la saarayaa xoojinta iyo bogsashada
- Qiimaynta amniga iyo qorshaynta
- U wareejinta ilaha sharciga, caafimaadka maskaxda, daaweynta iyo bulshada
- Caawinta nidaamyada kaxaynta
- Waxa lagu heli karaa qoraal telefoon, iyo qof ahaan
- 100% qarsoodi ah

Waa maxay “ogolaansho dhaqanka?” Marka laga hadlaya ogolaanshaha dhaqanka, waxaan caadiyan ka dhignaa dhaqanadda xiriirka cad iyo xurmeynta madaxbanaanida jirka ee qof walba. Ardayda waxaa la siiyaa aaladdo si ay u horumariyaan xirfado xiriirka ee wax ku ool ah. Waxaan baranaa sida loo codsado rukhsadda waxaana qadarinaa xuduudaha. Waxaan qaadnaa tallaabooyin si aan wax uga qabano iyo in aan uga hortagno rabshadaha. Waxaan si wax ku ool ah uga jawaabnaa dhacdooyinka dulmiga iyo xadgudubka xuduudaha anagoo taageeraynaa kuwa waxyeellada gaartay isla markaana lagula xisaabtamayaa kuwa waxyeellada geystay. Waxaan u isticmaalnaa dhaqamada dhaawacyada si aan u abuurno deegaanno dugsi oo ku habboon meelaha nabdoon oo lagu bogsado.

U-doodaha muxuu kaga duwan yahay lataliyaha dugsiga? Qareennadda u dooda xiriir caafimaad leh (Healthy Relationship Advocates (HRAs) waxay bixiyaan adeegyo gaar ah, oo takhasus leh oo loogu talagalay ardayda la dagaallamaya dhacdooyinka rabshadaha lammaanaha. HRA-yada waxay doonayaan inay dib u xoojiyaan shaqsiyaadkii la kulmay waxyeelo iyagoo siinaya meel qarsoodi ah oo ay iskood ku go'aamiyaan nooca taageerada ay jeclaan lahaayeen inay helaan. HRA-yada waxay bixiyaan ilo, ikhtiyaarro, iyo taageero aan xukun lahayn iyo la-talin ardayda oo haddii la doono dareemi karaa inay ka baqayaan waxa dhici karaa haddii ay waayo-aragnimadooda u sheegaan weriye khasab ah sida la-taliye ama tababare dugsiga. Gaar ahaanshaha xiriirka u doodista waxaa lagu ilaaliyaa [ORS 40.264](#). HRA-yada si dhow ayay ula shaqeeyaan dugsiyada si loo ilaaliyo badbaadada arday kasta iyadoo taageero la siinayo waalidiinta/masuuliyiinta maaraynayaa su'aalaha adag iyo xaalado oo aan hore loo marin.

Si aad uhesho adeegyada u doodista ama su'aalaha, fadlan la xiriir:

- Liane O’Banion, Ed.D., Agaasimaha, Title IX, PPS: lobanion@pps.net
- Nick Guerrero, Maareeyaha Barnaamijyada Bulshada-ku-saleysan, Raphael House: nguerrero@raphaelhouse.com
- Ashley Adams, Isuduwaha Adeegyada Gurmadka, VOA Home Free: aadams@voaor.org